Difaaca shaqaalaha ee la xiriira COVID-19

Shaqaalaha waxaa ilaaliya dhowr sharciyada gobolka iyo kuwa federaal ah. Ilaalintan iyo waajibaadka sharci ee saaran loo shaqeeyaha ayaa si faahfaahsan loogaga hadlayaa hoos. Warbixin dheeraad ah iyo hagid dheeraad ah oo loogu talagalay dadka Minnesota oo ku saabsan COVID-19 ayaa laga heli karaa www.mn.gov/covid19.

Isticmaalka fasaxa jirrada (sick leave)

Haddii loo-shaqeeyahaagu kuu ogolyahay inaad fasax u qaadato jirradaada, loo-shaqeeyahaagu sidoo kale waa inuu kuu ogolaadaa inaad fasax u qaadato markii uu kaa xanuunsanayo ilmo yar, ilmo qaangaar ah, xaas, walaal, waalid, soddoh, soddog, ilmo aad awoowe/ayeeyo u tahay, awoowgaa ayeeydaa ama xaaska waalidkaa. Loo shaqeeyahaagu waa inuu kuugu ogolaado inaad u isticmaasho wakhtigaaga jirrada si la mid ah sida uu kuugu ogolaado inaad fasax naftaada u isticmaasho. Sida uu qabo sharciga hadda jira, qodobkani ma khuseeyo dhammaan shaqaalaha iyo loo shaqeeyeyaasha oo dhan.

La soo xiriir Waaxda Shaqada iyo Waaxsoosaarka ee Minnesota (DLI) 651-284-5075, 800-342-5354 ama dli.laborstandards@state.mn.us wixii su'aalo ah.

Magaalooyinka Duluth, Minneapolis iyo St. Paul waxay leeyahay sharciyada jirrada iyo badbaadada oo u baahan loo-shaqeeyayaashu inay bixiyaan fasax lacag la'aan ah marka uu shaqaaluhu buko:

- Fasaxa jirrada iyo badbaadada Duluth;
- Fasaxa jirrada iyo badbaadada Minneapolis; iyo
- Fasaxa jirrada iyo badbaadada St. Paul.

Sharciga Fasaxa Caafimaadka Qoyska (Family Medical Leave Act (FMLA))

Sida ku xusan sharciga federaalka ee FMLA, loo shaqeeyeyaasha sharcigani ku waajibay waa inay siiyaan shaqaalaha shaqo-ilaalin, fasax aan lacag la siinaynin oo sababo cayiman oo qoyska iyo sababo caafimaad ah, oo ay ka mid noqon karaan COVID-19 marka ay dhibaatooyin ka dhashaan. Shaqaalaha ku jira fasaxa FMLA waxay xaq u leeyihiin sii-wadashada caymiska caafimaadka kooxeed iyada oo la raacayo shuruudaha ay ku jireen ka hor intaysan qaadan fasaxa FMLA.

Ka wac Waaxda Shaqada Maraykanka, Qaybta Mushaharka iyo Saacadaha, taleefanka 866-487-9243 wixii su'aalo ah ama booqo hagaha COVID-19 FMLA ee Waaxda Shaqada Maraykanka.

Sharciga Jawaab-celinta Coronavirus ee Federaalka (FFCRA)

FFCRA waxay u baahantahay in loo shaqeeyayaashu ay siiyaan shaqaalaha fasax balaaran oo qoyska iyo caafimaadka ah sababo cayiman oo la laxiriira COVID-19. Qaybta fasax balaaran ee qoyska iyo caafimaadka ee FFCRA ayaa khuseeya loo shaqeeyayaasha dowliga ah iyo loo shaqeeyeyaasha gaarka loo leeyahay ee leh shaqaale ka yar 500. Ganacsiyada yar yar ee haysta wax ka yar 50 shaqaale ayaa u qalmi kara ka dhaafitaanka shardiga ah ee looga baahan yahay in ay bixinayaan fasax sababta oo ah iskuullada oo la xiray ama heliwaaga daryeelka ilmaha haddii shardinimada fasuxu ay halis gelinayaan walaac laga qabo jiritaanka ganacsiga. Sidoo kale, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo kuwa gurmadka deg-degga ah waa laga saari karaa.

Guud ahaan, FFCRA waxay bixisaa in shaqaalaha u shaqeeya loo shaqeeyeyaasha sharcigani ku waajibay ay xaq u leeyihiin:

- laba toddobaad (ilaa 80 saacadood) oo fasax mushahar leh oo lagu bixinayo heerka mushaharka caadiga ah ee shaqaalaha (illaa $511 maalintii iyo isku darkeeda oo ah $5,110), marka shaqaaluhu uusan awoodin inuu shaqeeyo sababta oo ah shaqaalaha oo lakarantiilay (iyadoo la raacayo amarka federaalka, gobolka ama dawlada hoose ama talo bixin ka timid dhakhtar caafimaad), iyo/ama in aad isku aragtay astaamaha COVID-19 oo aad raadsanayso baaritaan caafimaad; ama
- laba toddobaad (ilaa 80 saacadood) oo fasax mushahar leh oo lagu bixinayo heerka musharka caadiga ah ee shaqaalaha (illaa $200 maalintii iyo isku darkeeda oo ah $2,000), marka shaqaaluhu uusan awoodin inuu shaqeeyo sababta oo ah shaqaalaha oo looga baahanyahay in uu dhab ahaantii daryeelo qof lakarantiilay (iyadoo la raacayo amarka federaalka, gobolka ama dawlada hoose ama talo bixin ka timid dhakhtar caafimaad), ama in aad daryeesho ilmo (ka yar 18 sano jir) oo iskuulkiisa ama xarunta daryeelka ilmuhu ay u xiran tahay ama aan la heli karin sababo la xiriira COVID-19 dartood; iyo
- ilaa 10 asbuuc oo dheeri ah oo ah fasax dheer oo qoyska iyo caafimaadka ah oo la bixinayo saddex-meelood laba tirada mushaharka joogtada ah ee shaqaalaha (ilaa $200 maalintii iyo isku darkeeda oo ah $12,000), marka shaqaaluhu uu soo shaqeynayey ugu yaraan 30 maalmood, uu awoodi waayo inuu shaqeeyo sababta oo ah baahi dhab ah oo u baahan in uu qaato fasax si uu u u daryeelo ilmo iskuulkiisa ama xarunta daryeelka ilmuhu ay u xiran tahay ama aan la heli karin sababo la xiriira COVID-19 dartood.

Ka wac Waaxda Shaqada Maraykanka, Qaybta Mushaharka iyo Saacadaha, taleefanka 866-487-9243 wixii su'aalo ah ama booqo www.dol.gov/agencies/whd/pandemic/ffcra-employee-paid-leave#_ftn3.

Loo shaqeeyuhu ma samayn karo takoorid

Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan u fududeyn macquul ah

Shakhsiyaadka naafada ah waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan "fududeyn/meelayn macquul ah" oo uu siiyo loo shaqeeyeyaasha uu ku waajibay Sharciga Naafada Mareykanka iyo/ama Sharciga Xuquuqda Aadamiga ee Minnesota.. Haddii aad leedahay naafonimo saamaynaysa halista ah in aad qaaddo COVID-19 ama in dhibaato kusoo gaarto haddii uu fayrasku kugu dhaco, waxaad xaq u leedahay inaad loo shaqeeyahaaga ka codsato fududaynta/meelaynta ku habboon. Tusaalooyinka u fududaynta macquulka ah waxaa ka mid ah:

- guriga ku shaqaynta

- fasaxa jirrada mushahar le, ka aan mushaharka lahayn;
- jadwalka shaqada oo la kala dur durkiyey; iyo
- beddelaada goobaha shaqada si loo fuliyo kala fogaanshaha bulshada.

Markaad dalbanayso u fududayn macquul ah, faahfaahi nooca u fududaynta aad codsatay iyo sida ay kaaga caawin doonto fulinta waajibaadka aasaasiga ah ee shaqadaada.

Xusuusin loogu talagalay loo shaqeeyayaasha

Loo shaqeeyayaashu waxay waydiin karaan shaqaalaha inay dareemayaan astaamo u eg hargab, sida qandho ama dhaxan, iyo qufac ama cune xanuun. Loo shaqeeyuhu waa inuu ilaaliyaa dhammaan macluumaadka ku saabsan jirrada shaqaaluhu in ay tahay diiwaan caafimaad oo qarsoodi ah iyadoo la raacayo sharciga gobolka iyo federaalka.

Inta lagu jiro aafada xanuunka faafa (pandemic), loo shaqeeyuhu ma weydiin karo shaqaalaha aan isku ogayn ama lahayn astaamo muuqda oo astaamaha hargabka ah in ay qabaan xaalad caafimaad oo Xarumaha Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurradu (CDC) ay sheegtay inay ka dhigayso qofka mid u nugul hargabka oo halis dhibaato keena. Xaalad kastaba loo shaqeeyuhu ma qaadan karo go'aano ku salaysan fikradaha qaldan ama eexda.

Haddii shaqaaluhu si iskood ah ay ugu sheegaan looshaqeeyahooda in ay qabaan xaalad caafimaad ama naafonimo oo ay halis saraysa ugu jiraan dhibaatooyinka COVID-19, loo shaqeeyuhu waa inuu u xafidaa macluumaadkan si qarsoodi/sir ah.

Loo shaqeeyayaashu uma malayn karaan shaqaalaha leh xaalado caafimaad oo la ogyahay ama naafonimo inay khatar weyn ugu jiraan dhibaatooyin ka yimaadda COVID-19. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan u diyaarsanaanta aafada xanuunka faafa (pandemic) ee goobta shaqada iyo shuruudaha sharciga ee la xiriira loo shaqeeyaha, booqo www.eeoc.gov/eeoc/newsroom/wysk/wysk_ada_rehabilitaion_act_coronavirus.cfm.

La xiriir Khadka Caawinta Takoorka ee Minnesota haddii loo-shaqeeyahaagu kuu diido u fududayn macquul ah adiga oo soo wacaya 833-454-0148 ama soo gudbinaya foomkan internetka ku jira. Adeeg turjumaad/turjubaan ayaa laguu heli karaa.

Shaqaalaha lama eryi karo lagumana diidi karo fursada in dib loo shaqaaleeyo in ay dalbadeen caymiska shaqo la'aanta

Loo shaqeeyayaashu sidoo kale kuma takoori karaan shaqaalaha sababta oo ah waxay dalbadeen ama heleen nacfiga caymiska shaqo la'aanta (UI). Sida ku xusan Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota, waa sharci darro in loo shaqeeye uu joojiyo ama haddii kale uu beddelo shuruudaha iyo xaaladaha shaqada shaqaalaha oo ay sababtiisu tahay shaqaalahaas ayaa dalbaday ama helay caymiska shaqo la'aanta (UI) ama nooc kasta oo ah gargaarka dadweyne.

La xiriir Khadka Caawinta Takoorka ee Minnesota haddii loo-shaqeeyahaagu uu shaqada kaa eryey ama uu kuu diidey in uu dib kuu soo shaqaaleeyo sababtoo ah waxaad u xaraysay caymiska shaqo la'aanta intii lagu jiray

COVID-19 adiga oo soo wacaya 833-454-0148 ama soo gudbinaya foomkan internetka ku jira. Adeeg turjumaad/turjubaan ayaa laguu heli karaa.

Nacfiga Caymiska Shaqo la’aanta

Haddii shaqadu kaa dhamaato ama saacadahaaga aad loo yareeyo, waa inaad codsato Nacfiga Caymiska Shaqo La’aanta (Unemployment Insurance (UI)) Habka codsigu wuxuu kuu ogolaanayaa inaad u sheegto barnaamijka Caymiska Shaqo La’aanta sababta aadan u shaqaynaynin. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Caymiska Shaqa La'aanta ama si aad u codsato nacfiga, booqo www.uimn.org.

Gov. Tim Walz wuxuu Maarso 16, 2020 soo saaray amar fulineed si uu si fiican ugu suurtogeliyo shaqaalaha ay saamaysay masiibada COVID-19 si ay u helaan nacfiyada shaqo la'aanta. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan amarkan fulinta iyo qaar ka mid ah su'aalaha iyo jawaabaha badanaa la isweydiiyo, booqo www.uimn.org/applicants/needtoknow/news-updates/covid-19.jsp.

Difaacyada loogu talagalay shaqaalaha uu ku dhaco ama uu soo gaaray COVID-19

Sida ku xusan sharciga caafimaadka gobolka, haddii uu kugu dhacay ama aad la kulantay/ku soo gaaray COVID-19 oo ay Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) kugula talinayso inaad joogtid guriga (is go'doomiso ama aad gooni isu bixiso), loo-shaqeeyahaagu kuma eryi karo, kuma anshaxmarin karo ama kuma ciqaabi doono haddii aad ka maqnaato shaqada. Difaacaani wuxuu sidoo kale khuseeyaa haddii aad u baahan tahay inaad daryeesho xubin ilmo ah ama qof qaangaar ah oo qoyska ka tirsan kuwaas oo MDH ay kula talisay go'doomin ama karantiil. (Qofka qaangaarka ah ee qoyska ka tirsan waa inuu lahaadaa naafonimo ama uu noqdaa qof weyn oo jilicsan.) Ilaalintan shaqaalaha waxaa la qaadan karaa 21 maalmood oo shaqo. Macluumaad dheeri ah, wac lambarka MDH oo ku siinaya talooyinkeeda.

Magdhowga Shaqaalaha

Haddii uu kugu dhaco cudur ka yimid oo kugu dhacay inta shaqadaadu ay socoto, waxaad xaq u yeelan kartaa nacfiga magdhowga shaqaalaha, oo ay ku jiraan bixinta mushaharka iyo nacfiyada caafimaadka. Si kastaba ha noqotee, waa inaad caddayso inaad cudurka ku qaadday shaqadaada darteed.

Haddii shaqaalaha gurmadka deg-deg ah uu ku dhaco cudur faafa ama cudurada la is qaadsiiyo, oo soo gaaray intii ay ku jireen shaqada ka baxsan isbitaalka, cudurkaas waxaa loo qaadanayaa inuu yahay cudur shaqadu keentay sababta dabeecada shaqadooda darteed.

Haddii aadan xannuunsanayn, laakiin ay waajib tahay inaad guriga ka joogto shaqada sababta oo ah waxa kusoo gaaray fayraska, xaq uma lihid nacfiga magdhowga shaqaalaha marka loo eego sharciga hadda jira.

Kiis kasta xaqiiqooyinkiisaa u gaar ah. Ka wac Waaxda Shaqaalaha iyo Waxsoosaarka taleefanka 800-342-5354 (riix 3) haddii aad su'aal ka qabto in aad xaq u leedahay nacfiga magdhowga shaqaalaha.

Mushaharka ugu dambeeya

Haddii shaqadaadu joogsato oo ciddii aad u shaqayn jirtay ku siin waydo mushaharkaaga u dambeeya, waxaa jira dhowr tallaabo oo aad qaadi karto si loo hubiyo in lagu siiyo dhammaan mushaharka aad ku leedahay. Si aad u ogaato talaabooyinka aad qaadi karto si aad u hesho mushaarkaaga ugu dambeeya, booqo bogga dalbashada mushaarka ugu dambeeya ee Waaxda Shaqaalaha iyo Waxsoosaarka.

Isbadalada xaaladaha shaqada

Amarada saacadaha dheeraaka ah (overtime)

Haddii loo shaqeeyuhu soo dhejiyo oo uu uga baahan yahay shaqaalaha inay shaqeeyaan saacado dheeraad ah, markaa waa inay bixiyaan wixii saacado dheeraad ah ee uu qofku kasbado iyadoo la raacayo sharciga gobolka ama kan federaalka. Sharciga gobolku wuxuu bixiyaa hal ka-dhaafitaan waqtiga dheeraadka ah ee looga baahan yahay kalkaaliyayaasha caafimaadka. Shaqaale kale ayaa waxaa laga yaabaa inay hoos yimaadaan heshiisyada gorgortanka wadajirka ah oo ay ku jiraan qodobo u ogolaanaya shaqaalaha inay ka baxaan saacadaha dheeraadka ah.

Isbadalada goobta shaqada

Loo shaqeeyayaasha waxaa looga baahan yahay inay la socdaan, diiwaangeliyaan oo ay bixiyaan dhammaan saacadaha shaqada ay qabtaan shaqaaluhu, waxaana laga yaabaa, duruufaha qaar, in looga baahan yahay inay u magdhabaan shaqaalaha kharashaadka la xiriira shaqada. Kharashaadkan waxaa dhici kara in aan la bixinin ilaa ay dhamaato shaqadu.

Saacadaha la shaqeeyay; saacadaha lacagtooda la bixiyey

Mushaharka shaqaalaha ka reeban (exempt workers)

Xaalado xaddidan qaarkood markii ganacsigu go'aansado inuu yareeyo saacadaha shaqada, loo shaqeeyuhu wuxuu yareyn karaa mushaharka shaqaalaha ka reeban (exempt worker). Haddii qofka shaqaalaha ah ee ka reeban (exempt worker) uu maalin shaqo oo buuxda shaqada uga maqnaado sababo aan ahayn in loo shaqaaleeyuhu uu yiri shaqo lama hayo, loo shaqeeyuhu wuxuu ka gooyn karaa qayb saami ah oo ah mushaharkooda ah. Loo shaqeeyuhu wuxuu ka goosan karaa xaddi mushaharkooda ah. Ka jaritaankan waxaa la sameyn karaa oo keliya haddii shaqaaluhu uusan qabanin wax howlo shaqo ah maalintaas. Loo shaqeeyuhu wax kama goosan karo mushaharka shaqaalaha ka reeban (exempt employee) ee asbuuca haddii sababta maqnaantu tahay inaysan jirin shaqo, marka laga reebo haddii aysan jirin wax shaqo ah usbuuca oo dhan.

Tabarucida

Shaqo tabaruc ah oo aan lacag laga bixin ayaa loo qaban karaa ururada samafalka ah ama hay'adaha dowlada. Loo shaqeeyeyaasha faa'iido doonka ah waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan mushaharka heerka ugu yar iyo saacadaha dheeraadka ah, iyo shuruudaha kale ee heerka shaqada, ee loogu talagalay dadka shaqada qabanaya.

Badbaadada goobta shaqada iyo caafimaadka

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan badbaadada goobta shaqada ama caafimaadka ee la xiriirta COVID-19, booqo www.dli.mn.gov/business/workplace-safety-and-health/mnosha-compliance-novel-coronavirus-covid-19.

Soo sheegista walaacyada caafimaadka iyo badbaadada ee goobta shaqada

Cidda aad u shaqaysaa kaama aargoosan karaan haddii aad kasoo warbixiso waxyaabaha ku saabsan caafimaadka iyo amniga ee goobta shaqada. Haddii aad aamminsan tahay in loo shaqeeyahaagu kaa aargoostay, waxaad dacwad ka xarayn kartaa Minnesota OSHA Compliance 30 maalmood gudahood laga soo bilaabo marka ficilka shaqada lagugu sameeyey.

Diidmada shaqada

Waxaad xaq u leedahay inaad diido inaad ka shaqayso xaaladaha aad adiga, aaminsanaantaada, aad si macquul ah u aaminsan tahay inaad ku dhowdahay in ay kusoo gaarto khatar dhimasho ama waxyeelo jireed. Khatar jir ahaaneed ee culus waxaa ka mid noqon kara jirro shaqada kaasoo gaarta oo kugu keenta naafonimo joogto ah, naafonimo guud oo ku meel gaar ah ama daaweyn caafimaad.

Aaminaad macquul ah oo aad aaminsantahay in ay jirto khatar dhimasho ama waxyeelo jirka ah oo halis ah waxaa ka mid ah in aad si macquul ah u aaminsantahay in shaqaalaha loo xilsaaray inuu ku shaqeeyo hab aan amaan ahayn ama caafimaad xumo leh oo wadata cudurada faafa. Coronavirus waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay cudurwade faafa.

Loo-shaqeeyahaagu kuma eryi karo ama si kale kuuma takoori karo haddii si daacadnimo ku salaysan aad u diido inaad qabato shaqooyinka laguu xilsaaray haddii aad weydiisatay loo-shaqeeyahaagu inuu saxo xaaladaha halista ah laakiin aan wali la sixin. Haddii aad si daacadnimo ah u diidday in aad gudato shaqooyinka laguu xilsaaray, oo cidda aad u shaqaysaa kuu bedeli wayday shaqo kale, waxaad la soo xiriiri kartaa U-hogaansanaanta OSHA Minnesota (MNOSHA) si aad u codsato caawimaad. U-hogaansanaanta OSHA ayaa la xiriiri doonta cidda aad u shaqayso si loo xalliyo walaacaaga. Haddii Minnesota OSHA Compliance (U hoggaansanaanta OSHA Minnesota) ay go'aamiso in aad ku jiri lahayd halis dhimasho ama dhaawac jireed oo daran oo ku soo gaara adiga oo gudanaya shaqada, markaa waxaad xaq u leedahay inaad hesho lacagta shaqada aad qaban lahayd.

Kala soo xiriir Minnesota OSHA Compliance osha.compliance@state.mn.us, 651-284-5050 ama 877-470-6742 wixii su'aalo ah.

-###-

Maajo 6, 2020